SHURUUDAHA AASAASIGA AH IYO HALBEEGYADA UGU HOOSEEYA EE GOOBAHA WAXBARASHADA DALKA

QEYBTA 1AAD: MAARAYNTA DUGSIGA IYO HOGAAMINTIISA

Halbeeg (Standard) 1.1: Maamulaha iyo maamule ku xigeenku waa inay ahaadaan, kuwo aqoon sare leh, sidoo kale inay leeyihiin qorshe ay ku hormarin karaan xirfadooda aqooned.

Maamulaha iyo ku xigeenkiisu waa inay:

1. Haystaan shahaado jaamacadeed heerka 1aad,
2. qaateen tababar macalinimo oo aan ka yarayn laba (2) sano, haystaanna shahaado macalinimo oo wasaaradu aqoonsan tahay
3. yahay qof akhlaaq wanaagsan oo dulqaad leh, maskaxdiisu fayow dahay, oo aan lagu xukumin fal-dembiyeedka maxkamadda.
4. uu ahaa maamule ku xigeen ugu yaraan hal sano.
5. leyihiin ugu yaraan shan sano oo waayo-aragnimo waxbarid ah[1].
6. ka soo muuqdaan Jadwalka dugsiga macalimiin ahaan[2]

MoECHE ma aqoonsana qof kasta oo maamulaya dugsiyada kaas oo aan haysan shahaadado macallinimo iyo aqoonta gudbinta manhajka[3]..

Halbeeg (Standard) 1.2: Dugsigu waa inuu leeyahay shaqaale kufilan iyo barayaal ku haboon oo leh tayo lana heli karo xogtooda lagama maarmaanka ah.

Dugsiga waxaa looga baahan yahay:

1. In saamigalka ardayda iyo macallinka (PTR) aysan ka badneyn 30 arday Dug. H/Dhexe iyo 35 ardayga Dug. Sare[45].
2. Inuu leeyahay shaqaalaha caawinta ee lagama marmaanka ah ee aan macallimiinta aheyn sida:
    a. Waardiye tabobaran oo habeen iyo maalinba shaqeeya
    b. shaqaale nadaafadeed
    c. Xoghaye
3. Inuu xafido diiwaanka shaqaalaha lagama maarmaanka ah sida

[1] Education Act 2017, Article 24. P. 14
[2] ibid. P. 22
[3] Teacher Policy, 2021. P. 24
[4] National Education Policy, Somalia, 2020. P. 48
[5] Quality Assurance Framework suggests a ratio of 1:45

a. Galka kulanka shaqaalaha
b. Galka qiimaynta shaqaalaha: term iyo sannadle ah
c. Buugga xaadirinta shaqaalaha ee maalinlaha ah
d. Gal gaar ah xubin kasta oo shaqaale ah ee ay ku dhan tahay xogtiisa.

Halbeeg (Standard) 1.3: Maamulaha dugsigu waa inuu leeyahay tayo hogaamineed, uuna kaga qaybqaadan karo hirgelinta himilada iyo hiigsiga dugsiga.

Dugsigu waa inuu lahaadaa Hiigsi (vision) cad oo cayiman (specific) taas oo:

- ka jawaabaysa mudnaanta iyo ujeedooyinka qaraan
- leh ujeedooyin cad cad (SMART)
- ah mid cad oo ay fahmi karaan daneeyayaasha
- lagu dhejiyay meel laga wada arki karo sida xafiiska maamulaha, qofka shaqaalaha, hoolka shirarka iyo fasallada.
- Loo sameeyay hab ka wada qeybgal ah

Dugsigu waa in uu leeyahay Himilo (mission) cad oo cayiman kaas oo:

- leh ujeedooyin cad cad (SMART)
- lagu qoray luqad cad oo la fahmi karo
- Loo sameeyay hab ka wada qeybgal ah
- lagu dhejiyay meel laga wada arki karo sida xafiiska maamulaha, qofka shaqaalaha, hoolka shirarka iyo fasallada.

Halbeeg (Standard) 1.4: Dugsigu waa inuu sameeyaa is-qiimaynta sanadlaha ah, taas oo jawaabta kasoo baxda lagu daro Qorshaha Hormarinta Dugsiga (QHD) kaas oo leh ujeedooyin caqli gal ayna ka wada qeybgaleen dhamaan daneeyayaasha si ay fulinta qeyb uga noqdaan.

QHD-ga:

- Waa inuu leeyahay ujeedooyin iyo yoolal la cabbiri karo
- Waa inuu si cad u tilmaamaa agabka (resources) loo baahan yahay si loo fuliyo
- Waa inay ansixiyeen Guddiga Waxbarashada Deegaanka (GWD).

Halbeeg 1.5: Maamulka dugsigu waa inuu si joogto ah ula socdaa habka waxbaridda iyo barashada uuna horumariyaa habab lagula dagaallamo maqnaanshaha ardayda iyo dugsiga ka tegista.

Maamulaha dugsigu waa inuu:

- Si joogto ah u booqdo fasallada si uu u kormeero habka waxbarista iyo waxbarashada si maalinle ah
- In uu yeesho qorshe aad si joogto ah kula soconayo ka maqnaanshaha ardayda iyo ka tagistoda dugsiga uuna qaadaa tillaaboyinka hagaajinta si loola dagaallamo arrintaas.

Halbeeg 1.6: Maamulaha dugsigu waa inuu dugsiga ku hagaamiyaa fulinta manhajka iyo qiimaynta ardayda taas oo leh habab waxbarid iyo waxbarasho hal-abuur ah, kaas oo ay ka faa'iideysanayaa ardayda oo dhan.

Maamulaha ama ku xigeenkiisa waa inuu hubiyaa in:

- Macallin kastaa haysto qorshe hawleedka sannadka (Scheme of Work) oo loo ansixiyay
- Macallin kastaa haysto qorsho cashar (lesson) oo qorshe hawleedka sannadka ee la ansixiyay
- uu diiwangaliyo la socodkiisa qorshaha sannadka iyo midka casharka.

Halbeeg 1.7: Maamuluhu waa inuu si wax ku ool ah u xafidaa diiwaanada lagama maarmaanka ah ee ardayga, si joogto ahna u qabtaa kulanka shaqaalaha.

Dugsiga:

- Diiwangelinta ardaydu si sax ah ayuu u koobayaa ardayda fasalka, lambaradooda waxbarashado, taariikhda dhalashada, xaafadda, waxaana lagu hayaa xafiiska, si joogto ahna ayuu ula socdaa una cusbooneysiiyaa maamuluhu lana wadaaga WWH&TS.
- Diiwaanada dhammaan ardayda la wareejiyay waa la hayaa si joogto ah ayaa loogu cusboonaysiiyaa diiwaanka iyo EMIS-ka.
- Diiwaanada dhammaan ardayda baahiyaha waxbarashada ee gaarka ah qaba waa la hayaa si joogto ahna ayaa loogu cusboonaysiiyaa EMIS-ka.
- Dhammaan xogta dugsiga waxaa lagu hayaa qaab softcopy iyo hardcopy labadaba.
- Diiwaanada ardayda ee soo socda waa inay diyaar yihiin:
    - Gal gaar ah ee arday kasta ah
    - Natiijooyinka imtixaanada oo lagu falanqeeyay darajada, baasaska iyo aqoonta oo lagu soo bandhigay xafiiska maamulaha iyo fasalada
    - Gal Anshax
    - Diiwaanada xuduurka maalinlaha ah ee ardayda fasalkiiba

- Dugsigu waxa uu qabanqaabiyaa/qabtaa ugu yaraan saddex kulan oo shaqaale ah bilowga dhexda, iyo dhammaadka teeramka.

Halbeeg 1.8: Maamuluhu waa inuu xaqiijiyaa in lacagaha dugsiga loo maareeyo si wax ku ool ah, iyadoo loo marayo qorshaynta maaliyadeed, nidaamyo iyo kontoroolo sax ah oo la hubiyay wuxuuna dugsigu leeyahay diiwaanka ilaalinta hantida dugsig.

Dugsigu:

- Waxaa uu leeyahay Miisaaniyad Sannadeedka Dugsi oo la sameeyay iyadoo ay ka qayb qaadanayaan guddiga dugsiga & shaqaalaha xilalka mas'uuliyadda maaliyadda haya.
- Wuxuu leeyahay akoon bangi oo rasmiga ah oo leh saxiixayaal cad
- Wuxu leeyahay diiwanta diiwaanka alaabada/hantida oo cusboonaysiisan (updated) si loogu diiwaan geliyo, loogu kaydiyo oo loogu xafido dhammaan hantida dugsiga ayadoo tixgalin dheeri la siinayo khaanadaha kiimikada si ay had iyo jeer u noqdaan kuwo xidhan oo badbaado leh.

QEYBTA 2AAD: DEEGAANKA DUGSIGA IYO BADQABKIISA

Halbeeg 2.1: Deegaanka muuqaaleed ee dugsigu waa mid si wanaagsan loo dayactiray, ardayda oo dhamina way haleeli kartaa wuxuuna leeyahay goobo nadaafadeed oo kufilan iyo goobo loogu talogalay manhajka dheeriga ah, si cad ayuuna u xuduudeysan yahay.

Dugsigu:

- Wxuxu ka dhisan yahay dhul cabarkiisu yahay 100mx150m haddi uu boodhin leeyahay ama 100mx100m haddi uusan laheyn boodhin[6].
- Waxaa ku wareegsan dayr dheerkisu yahay 2m ah kana fog 30m dhismayaasha ku dhow[7]
- si wanaagsan ayaa loo dayactiray waxaa adeegsan kara dhammaan ardayda baahiyaha gaarka ah qaba.
- wuxuu leeyahay calaamad cad oo muujinaysa magaca dugsiga, noociisa, xuduudiisana si cad ayaa loo calaamadeeyay, calaamadaha dhulka dugsigu si fiican bay u muuqdaan.

[6] National Education Policy, Somalia, 2020, 47. Also Private schools Policy. P.24

[7] ibid. 48 and 25 respectively.

- wuxuu leeyahay musqulo kala soocan (lab iyo dhedig), ku filan oo nadiif ah oo leh biyo iyo saabuun gacmaha lagu dhaqo (1 musqul ilaa 25 gabdhood, iyo 1 musqul ilaa 30 wiil[8])[9], ugu yaraan 10 mitir u jirta fasalada[10].
- Wuxuu leeyahay garoomo cayaareed oo loo isticmaalo ciyaaraha dibadda oo leh du siman iyo qalab ciyaareed.
- wuxuu leeyahay dhul siman si wanaagsana loo dayactiray[11] (ma jiraan dildilaacyo halis ah oo gidaarada iyo aasaaska ah, saqafyadu ma da'ayaan, ma jiraan dabaqyo maqan).
- Wuxuu ka fog tahay ugu yaraan 300 mitir meelaha biyaha khatarta ah, ceelasha/godadka furan, warshado, waddooyin, isbitaallo, iyo goobo la mid ah[12]

Halbeeg 2.2: Goobaha waxbarashada dugsigu waa in si wanaagsan loo dayactiray, si wanaagsana loo qalabeeyey.
Dugsigu wuxuu leeyahay:

- Tiradii fasalada la isla qeexay ee 8 fasal H/dhexe iyo 4 fasal Dug. sare oo cabbirkoodu yahay 8mx6m oo leh hawo ku filan iyo albaabo qufulmaya[13][14], (hal fasal aagagga xoolo-dhaqatada ee Dug. h/dhexe[15])
- Fasallo nadiif ah oo habaysan, oo ku filan saamigalka ardayga iyo fasallada oo ah 1:30 Du. H/dhexe iyo 1:35 Dug. sare[16][17], si wanaagsanna loo dayactiro[18].
- kuraas iyo miisas ku filan (3 arday/miiskii) [19] oo ku sugan xaalad wanaagsan oo leh dherer iyo cabbir ku habboon da'da ardayda ayna adeegsan karan dhammaan ardayda sida kuwa leh baahiyaha waxbarashada gaarka ah.

[8] Quality Assurance Framework, 2021. 42
[9] National Education Policy requires a minimum of 3 washrooms for each 4 classrooms (secondary), and 4 for 8 (primary) 48
[10] Draft School Planning and Building Policy, Somalia, 2021
[11] ibid. 9
[12] National Education Policy, Somalia, 2020, 48
[13] ibid.
[14] Quality Assurance Framework, 2021. 43
[15] Draft School Planning and Building Policy, Somalia, 2021. 9, Education Act 2017. 2
[16] National Education Policy, Somalia, 2020, 48
[17] Quality Assurance Framework requires 1:53 ration. 42
[18] A school may be established with at least 25 students and a suitable place for teaching and learning. Education Act 2017. 13
[19] Draft School Planning and Building Policy, Somalia, 2021

Halbeeg 2.3: Goobaha aan waxbarida loogu talogalin ee dugsigu waa kuwo si wanaagsan loo hagaajiyey nadaafaad ahaan kuna habboon ujeedooyinka laga leeyahay:
Dugsigu wuxuu leeyahay:

- xafiis maamule oo leh armaajo qufulmaysa, qalab xafiiseedk iyo meel shirarka lagu qabto (ugu yaraan 20m2 cabirkisu yahay) [20]
- Qol shaqaale oo nadiif ah (cabirkiisu yahay ugu 30m2) [21] oo loogu talagalay macallimiinta oo leh miisas iyo kuraas ku filan dhammaan xubnaha lehna boorarka ogeysiisyada oo ay arki karaan dhammaan shaqaalaha.
- qolka kaydinta agabka oo bedqab leh, nadiif ah, hadana qufulmaya.
- Masjid ay ku tukadaan shaqaalaha iyo macalimiinta iyo ardayda

Halbeeg 2.4 Dugsigu waa inuu bixiyaa/leeyahay adeegyo sugan oo joogto ah oo la isku hallayn karo uuna si wanagsan ugu diyaarsan yahay xaaladaha degdega ah.
Dugsigu wuxuu leeyahay:

- Biyo soconaya (taangiyada biyaha) ee loo adeegsado fayadhowrka[22]
- Adeeg internetka oo ku filan baahida dugsiga oo dhan
- Bar-kulan biyo la cabo oo ku filan (3 litir ardaygiiba maalintii) [23]
- 160kii qofba 2 dab-damis oo ku filan oo si sahal ah u haleeli karan dhammaan dadka[24] kuna yaal fasallada, qolka shaqaalaha, qolalka kaydka, maktabadda, musqulaha, kuwaas oo shaqaalaha iyo ardayduba lagu tababaro sida loo isticmaalo.

QEYBTA 3AAD: FULINTA IYO HIRGALINTA MANHAJKA

Halbeeg 3.1: Dugsigu waa inuu leeyahay barayaal tayaysan, lehna anshax kana qayb qaadan kara dhamaan howlaha dugsiga.
Guud ahaan, macallinku:

- waa inuu si sharci ah u qaatay ogolaansho inuu wax ka dhigo dugsiyada dalka ee heer walba oo waxbarasho[25].

[20] ibid, 17
[21] ibid.
[22] ibid. 9
[23] WASH Cluster Somalia, 2018
[24] National Education Policy, Somalia, 2020, 48
[25] Education Act 2017. 2

- Waa in uu buuxiyaa shuruudaha soo socda si aad u noqoto macalin:
    - Waa in uu leeyahay waxbarasho buuxisa ama u dhiganta heerka saddexaad ee waxbarashada dalka
    - Waa in uu qaatay tababar macalinimo oo aan ka yareyn laba (2) sano, haystana shahaado macalinimo oo wasaaradu aqoonsan tahay.
    - Waa in aanusan adeegsan daroogooyinka wax u dhimi kara caafimaadkiisa, kartidiisa shaqo, go'aan gaadhistiisa, ama sumcadda bulshada dhexdeeda.
    - Waa in uu leeyahay dabeecad wanaagsan iyo dulqaad leh, maskaxdiisu fiyow dahay, oo aanay maxkamadi dembi ku xukumin[26]..
- Waa in uu qaataa ugu yaraan hal koorso tababar ah labadii sanaba mar.
- Macalinka Dug. H/dhexe waa in uu qaataa ugu yaraan laba sano oo tababar macalinimo ah[27].
- Macallinka dugsiga sare waa inuu haystaa shahaado afar sano ah oo uu kuna takhasusay ugu yaraa labo maaddo oo major iyo kuwo minor ah[28].
- Macallinku "waa inuu iska diwaan-geliyaa Waaxda Horumarinta Macallimiinta ka hor inta uusan ku biirin nooc kasta oo macallinimo ah ee goob kasta oo waxbarasho"[29]..
- Macallinka raba inuu iska casilo [ka-tagga shaqada] waa inuu bixiyaa ogeysiis hal bil ah oo ku saabsan ujeeddada taggidiisa uuna sii wado shaqada inta bishaas ah[30].

Halbeeg 3.2: Barayaashu waa inay lahaadaan qorshaha fulinta manhajka Qaranka, waana inay si hufan u adeegsadaan..

Dugsiga:

- Waa inuu shaqeeyo 6 maalmod wiigii bixiyana 42 xiso wiig kasta uuna furan yahay 36[31] wiig oo aysan ku jirin maalmaha imtixaanka[32].
- Waa inuu dhigaa 10 maado dug. H/dhexe, iyo 13 maado Du. Sare, waqtiga xiisaduna waa inuu yahay 40 daqiqo Dug. H/dhex iyo 45 Dug. Sare[33].

[26] Education Act 2017, Article 24. P. 12
[27] Teacher Policy 2021. P. 7
[28] ibid.
[29] ibid. P. 15
[30] Teacher Policy, 2021. P. 25
[31] Education Act 2017, Article 54. P. 21
[32] Curriculum Framework, 2017. P. 36
[33] ibid. P. 36-37

- Dhammaan macalimiintu waxay haystaa nuqulka ah Qorshaha shaqo sanadeed (scheme of work) la ansixiyay ee maaddo kasta.
- wuxuu leeyahay macalimiin leh qorshe cashar (lesson plan) oo leh ujeedooyinka cashar, habka nuxurka iyo agabka la isticmaali doono.
- wuxuu leeyahay macalimiin si adag ugu isticmaala Siyaasadda Luuqadda (luuqada maadada) ee dugsiyada sare

Halbeeg 3.3: Dugsigu waa inuu leeyahay qalab iyo agab kufilan,si loo helo jawi waxbarid iyo waxbarasho guul leh.
Dugsigu wuxuu haystaa:

- Qalab ama agab ku filan ee loogu baahan yahay waxbarid iyo waxbarasho wax ku ool ah oo ku sugan xaalad wanaagsan iyo qorshe loo dejiyay in lagu ilaalinayo/dayactiro. Fasal kasta waa inuu lahaadaa:
    - Khariidadda Soomaaliya iyo Adduunka (maya Dug. H/dhexe)
    - Meel (space) ku filan dhaqdhaqaaqa macalinka
    - weel qashinka lagu shubo
    - Qalabka sabuuradda wax lagula sawiro.
    - Qalab xisaabeed ah
    - Subaarada (cad and midab leh)
    - Kursi iyo miiska macallinka
    - Jadwal fasal oo ku dhegan meel muuqata ee dhamman ardaydu arkaan
    - Boorka ogeysiiska fasalka
- Dhammaan ardaydu waxay haystaan buug qoraal ah iyo qalin/qalinqori waxayna haystaan buugaag maadada lagu dhigto oo saamigu yahay 1:1[34]..

Halbeeg 3.4: Waxbarida iyo barashada dugsiga waa in lagu taageeraa agab baris-barasho oo haboon si loo gaaro natiijo sare.
Dugsigu wuxuu leeyahay:

- Maktabad nadiif ah, badbaado leh, oo quful leh, oo leh buug ku filan, habboon, oo tayo leh (xajmiga ugu yar 80m2) [35] iyo wakhti maktabadeed oo ku dhex jirtaa jadwalka fasalka (kaliya Dug. Sare).

[34] National Education Policy, Somalia, 2020, 17
[35] Draft School Planning and Building Policy, Somalia, 2021. 17

- Shaybaar si ku filan u qalabaysan oo loogu talagalay dhammaan maaddooyinka uu bahaan practical ka karo (kaliya Dug. Sare) [36].
- Macalimiin maaddooyinka u baahan practical ka oo sida habboon u isticmaala shaybaadhka.
- Macalimiin ka faa'iidaysta ICT-ga marka waxbarayaaan.

QEYBTA 4AAD: QIIMEYNTA ARDAYGA

Halbeeg 4.1: Howlaha qiimaynta waa in la fuliyaa heerarka kala duwan ee waxbarashada ardayda.

Dugsiga:

- Macallimiintu waxay isticmaalaan hababka qiimaynta habboon (qiimaynta xilliga waxbarashada socoto) si ay u ururiyaan caddaymaha waxa ardaydu awoodaan iyo waxa aanay awoodi karin wayna diiwangaliyaan natiijooyinka
- Dhammaan macalimiintu waxay leeyihiin qorshe qiimayn oo cad ee dhammaadka cutub kasta iyo sidoo kale teeramka, natiijooyinkana si wanaagsan ayay u diiwaangaliyaan[37]..
- Inta badan aradaydu waxay dhamaan maadooyinka ka gaaraan natiijo wanaagsan ee imtixaanka heer qaran iyo heer gobol (fasalka 12&8).).

Halbeeg 4.2: Natiijooyinka qiimaynta waxaa lala socodsiiyaa ardayda,waalidiinta iyo daneeyayaasha muhiimka ah waqtiga ku haboon si looga faaiidaysto**.**

Dugsiga:

- Ardeyga walba waxaa uu helaa natiijada kasoobaxdey imtixaanka dhammaadka ah.
- Dugsigu waxaa uu waalidiinta/masuuliyinta la wadaagaa warbixinta guuulaha iyo caqabadaa waxbarashada ardaya waa uu keeydiyaa xogtaas.
- Dugsigu waxaa uu qaadaa talaabooyin uu ku caawinayo ardayda ay waxbarashadu ku adagtahay

QEYBTA 5AAD: XIRIIRKA BULSHADA IYO KA QAYBGALKODA

[36] ibid.

[37] Education Act 2017. Article 51. 20

Halbeeg 5.1: Dugsigu waa inuu aasaasaa iskaashi xooggan oo uu la leeyahay waalidiinta iyo bulshada deegaanka**.**

Dugsigu wuxuu leeyahay:

- Dugsiga waxaa uu leeyahay Gudiga Waxbarashada Deeganka (GWD) kaas qeyb ka ah maamulka iyo hogaaminta dugsiga [38][39].
- GWD-du wuxuu u shaqeeyaa si iskaa wax u qabso ah oo kana kooban xubnaha soo socda ugu yaraan[40]:
    - Todobo xubnood.
    - Gudoomiye.
    - Xoghaye kaas oo ah mamulaha dugsi
    - Shan xubnood oo ay ku jiraan: 3 waalidiin ah, hal qof hogaamiye bulshada ah iyo hal qof oo wadaad ah.
- GWD-gu wuxuu helaa tababar ku saabsan doorkooda iyo mas'uuliyadahooda[41].

Halbeeg 5.2: Dugsigu waa inuu si joogto ah u qabanqaabiyaa kulanka GWD uuna lawadaagaa macluumaadka laxiriira arimaha dugsiga**.**

Dugsiga:

- GWD-ga Dugsigu wuxuu kulmaa bil walba saddex saacadood, ajendaha shirka iyo dukumentiyada waxaa loo qaybiyaa xubnaha shan maalmood oo shaqo gudahood ka hor kulanka[42].
- Shirqaadka (minutes) shirarka waa la qoraa waana la qeybiyaa waxaana laa hayaa si uu u noqdo tixraac iyo u hoggaansanaan sharciyeed.
- Kooramka guddigu waa shan (5) qof[43],.
  Dugsigu wuxuu qabanqaabiyaa ugu yaraan HAL shir guud sannadkii oo loogu talagalay waalidiinta iyo macallimiinta si ay uga wada hadlaan arimo ay kamid yihiin:
    - maamulka dugsiga

[38] Education Act 2017. Article 32. 15. Private Schools Policy. P. 25
[39] Education Act 2017, Article 43. P. 18
[40] A Policy Framework for Community Education Committees (CECs), 2020. P. 15
[41] ibid. P. 14
[42] ibid. P. 16
[43] ibid.

- Waxbarista iyo Waxbarashada
- Arimaha anshaxa ardayda
- isticmaalka dhaqalaha iyo helidiisa.